


Xiliyada siinta masaasada ilmaha


Sida wanaagsan ama amniga ah ee ilmaha caanaha lagu siiyo masaasadu waa mid ku haboon. Waxay ka yareysaa ilmaha walaaca, wuxuuna fursad u helayaa hadba inuu cabo caddada ku haboon. Xiliga quudinta cuniga waxaa muhiim ah in, ruuxa weyn uu la socodo fariimaha/hadaaqa cunuga isla markaasna uu uga jawaabo.

Fariinta cunuga waa gaajo heysa wuu yuusaa, hadba dhinac madax u roгаа, afka kala furaa, isagood moodo inuu faruuryaha wax malabsanayo, markaasna ma aha inaad sugto. Haddii ilmuhu ooyayaan wuu kasii daraa markaad quudineysana, wuxuuna u baahan yahay in la xasiliyo markaas.



← Masaasada wanaagsan ilmuhu wuxuu moodaa naaska ibtiisa. Iney ahaato mid jilicsan, toosan, daloolkuna u yar yahay.

→ Ilmaha inta badan dhabta ayaa lagu quudiyaa. Ilmaha markaad dhabta ku qabanaysana waa inuu madaxiisu koreeyo oo gacantaa kor ugu soo qaado dhinac dhinacana gacantaad ugu jiiifo cajirkaagana saaran yahay. Ilmaha mar saani wax usii, marka xigta gacanta aad ku heyso bedel oo bidixda ku qabo. Inaad hadba dhinac u qabato kobaciisa ayey u wanaagsan tahay.




1 Taabsii masaasada afkeeda adigoo taxadaraya ilmihii afkiisa, si uu u malabsado kadibna afka u kala furo. Haku riixin si qasaba ilmihii afkiisa, iska sug intuu ka cantuugayo masaasadii.



2 Masaasada haku foorarin si aysan caanihii ugu daadan. Afka masaasada oo maran ha nuugo ilmihii muddo daqiiqad ah, sidii naaska.



3 Janjeeri masaasada si caanihii usoo galaan. Ilmihiina isagaa nuugaya una laqaya si iskiis ah, mararka qaar si uu u neefsado hakad ka geli nuujinta.



4 Daawo weji ka weji ilmaha xiliga aad quudineyso. Haddii caanuhu ay xoog ugu socdaan ama inuusan rabin, wuu kaa diidayaa kuuna **muujinayaa walaaciisa.**



5 Markaad dareento fariintiisa ama uu joojiyo nuugistii wakhti dheer, janjeeri masaasadii in masaasadii aad ku garooriso caanihii, kana ilaali iney masaasadii gaarto dalqada cunuga. Haddii ilmihii weli rabo inuu cabo, wuxuu bilaabaa inuu dib u dhuuqo. Markii cunuga dhinac dhinac u yaalo ma malabsanayo mana sii wadayo nuugistii.

Dibiro?

Cunugii markuu dhuuqo masaasad maran, waxba ma laqayo. Fariinta xasilonida ee ilmaha markuu nuugayo caanaha waxaa la socota hawo yar galeysana calooshii. Ilmaha inaad madax kor ugu soo qaado markaad quudineyso hawadii badideed wey soo baxdaa intaad nuujineyso oo sankey ka baxdaa.

Waxaad ku ogaan walaaca

- isa soo kaduudin/jiirasho, muuqaal welwel leh
- faraha lugaha iyo gacmaha ood moodo iney dhadeen
- afkii dhiniciisa oo caanihii ka socdaan
- laqitaan degdega iyo codka laqitaanka
- neef qaadasho, xiiqsanaan ama neeftuur/riin
- inuu madaxa warwareejiyo diidana masaasada

Masaasad wax ku siintu waa wadashaqeyn dareen aad wadaageysan adiga iyo ilmihii. Ilmuhu wuxuu u baahan yahay xili quudin iyo u sheekeyn uu ruuxa weyni turjumanaya fariinta ilmihii. Waligaa ha yeelin inaad ilmihii keligiis inta masaasad afka u gelisid aad kaga takto.